

Waxa aad sameyn karto haddii dhaawac uu ku soo gaaro ama aad ku xanuunsato goobtaada shaqada

1

Haddii uu dhawac ku soo gaaro amaba aad xanuunsato adigoo jooga goobtaada shaqada

Waxaad haysataa muddo lix bilood ah laga bilaabo taariikhda uu dhaawaca ku soo gaaray ama taariikhda xanuunka lagaa helay si aad uu hesho faa'iidooyinka magdhowga ah ee aad xaqa uu leedahay adiga usoo sheegaya dhawacaaga amaba xanuunkaaga WSIB.

Waa inaad soo sheegtaa dhaawaca ama xanuunka ka soo gaaray goobtaada shaqada xitaa haddii:

- kormeerahaaga ama maamulahaagu kugu yiraahdo ha sheegin, amaba ay ku handadaan inaad lumin doonto shaqadaada haddii aad sheegtid
- loo shaqeeyahaagu ku yiraahdo WSIB ma daboolayso dhaawaca ku soo gaaray amaba xanuunkaaga
- loo shayeeyahaagu ku yiraahdo isticmaal maalmaha fasaxa ee aad xaqa uu leedahay si aad uga soo kabsato dhawaca ka soo gaaray amaba xanuunkaaga , halkii aad ka soo sheegi lahayd

2

Ganacsiyada

Waa inaad usoo sheegtaa WSIB haddii uu dhawac ka soo gaaro amaba aad ku xanuunsato goobtaada shaqada saddex maalmood gudahood marka aad ogaato.

Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad soo sheegto wixii dhaawac amaba xanuun ah ee soo gaara qof kasta ee aad ka shaqaaleysiiso goobtaada ganacsi, oo ay ku jiraan xubnaha qoyskaaga, shaqaalaha mar mar la shaqaaleysiiyoama shaqaalaha ku meelgaarka ah, shaqaalaha qaar ee ka shaqeeya guryaha, shaqaalaha ka shaqeeya dhismaha guryaha, ardayda, ardayda dhamaysatay waxbarashada ee goobta shaqada uu jooga si ay ugu kororsadan aqoon xirfadda.

Xitaa haddii aaddan hubin in dhaawucu ama xanuunku uu shaqadda xiriir la leeyahay, waa inaad soo sheegtaa. Annaga ayaa go'aan ka gaareyna haddii uu dhawaca ama xanuunka xiriir la leeyahay shaqada.

Waxey ka soo horjeedaa sharciga inaad is hor istaagto in la soo sheego dhaawaca ka soo gaaray amaba xanuunka uu qofka ka qaaday goobta shaqada.

3



Sawir koodka QR amaba booqo mareegta ah wsib.ca/reporting si aad usoo sheegto dhawaca ka soo gaaray amaba xanuunka aad ka qaaday goobta shaqada.

Raac tallaabayn haddii uu dhawac ku soo gaaray amaba aad ku xanuunsatay goobta shaqada

| Tallaabada | Haddii aad ku dhawacanto amaba aad ku xanuunsato goobta shaqada | Ganacsiyada |
|---|--|---|
| <p>1 Raadso gargaar caafimaad</p> | <p>Isla markiiba raadso gargaarka degdegga ah Uu tag xirfadle caafimaad ama aad isbitaalka haddii aad u baahan tahay daaweyn dheeraad ah. Loo shaqeeyahaaga ayaa bixinaya lacagta ku baxaysa baabuur raaca maalinta uu daawaca ku soo gaaray.</p> | <p>Sii gargaarka degdegga ah oo hay xogaha saxda ah ee daaweynta la siiyay. Haddii shaqaalahaagu u baahan yahay daryeel caafimaad, waa inaad u geysaa xirfadle caafimaad ama aad bixiso lacagta baabuur raaca maalinta uu dhawaca soo gaaray.</p> |
| <p>2 Dokumentiga</p> | <p>U sheeg loo shaqeeyahaaga dhaawaca ku soo gaaray amaba xanuunka aad qabto iyo wixii dabiib caafimaad ee lagu fidiyey sida ugu dhaqsiyaha badan. Bixi faahfaahin buuxda intii suurto gal ah.</p> | <p>Marka qofka shaqaalaha uu soo gaaro dhaawac ama xanuun la xiriira shaqada uu qabto, hel macluumaad ku saabsan dhaawaca ama xanuunka iyo waxa sababay sida qofka shaqaalaha usoo sheegay. Qor macluumaadkan, iyo sidoo kale wixii gargaar degdegga ah ee aad fidiseen.</p> |
| <p>3 Ku wargeli WSIB</p> | <p>Sawir koodka QR amaba booqo mareegta wsib.ca/reporting si aad usoo gudbiso warbixinta dhaawaca soo gaaray amaba xanuunka uu qabo qofka shaqaalaha ah (Foomka 6-aad) haddii:</p> <ul style="list-style-type: none"> • aad uga baahan tahay daaweyn xirfadle caafimaad, ama • aadan awoodin inaad tagto shaqada, ama • lacagta lagu siiyaa ay yar tahay ama saacado yar aad shaqeyso, ama • aad u baahan tahay shaqo wax laga beddeley iyada oo lagu siinayo lacag joogta ah wixii ka badan toddoba maalmood <p>Loo shaqeeyahaagu waa inuu soo sheegaa dhawacaaga ama xanuunkaaga saddex maalmood gudahood waana in uu ku siiyaa nuqulka warbixintooda.</p> | <p>Sawir koodka QR ama booqo mareegta ah wsib.ca/reporting si aad usoo gudbiso warbixinta dhaawaca/xanuunka shaqaalaha (Foomka 7-aad). Waa inaad soo gudbisaa warbixinta saddex maalmood gudahood marka aad ogaatid dhaawaca ka soo gaaray ama xanuunka aad ka qaaday goobta shaqada haddii shaqaalahaagu:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Uu u baahan yahay daaweyn uu ka helo xirfadle caafimaad, amaba • uu goobta shaqada ka maqan yahay, ama • u qaato mushaar ka yar kii joogtada ahaa, ama • uu u baahan yahay shaqo wax laga beddeley iyada oo la siinayo mushaar joogtaah wixii ka badan toddoba maalmood <p>Waa inaad siisaa qofka shaqaalahaaga ah nuqulka warbixintaada ee dhawaca soo gaaray ama xanuunka uu ka qaaday goobta shaqada. Waa inaad siisaa qofka shaqaalahaaga ah mushaar buuxa maalinta dhibaataadu ay dhacday.</p> |
| <p>4 Si wadajir ah isula shaqeeyno</p> | <p>Aan isla socono. Waan idinla shaqeyneynaa adiga iyo loo shaqeeyahaagaba si aan kaaga caawino inaad ka soo kabsato oo si badqab leh shaqada aad ugu laabato, wakhtiga ugu habboon.</p> | <p>Aan isla socono. Waan idinla shaqeyneynaa adiga iyo shaqaalahaagaba si aan uga caawino inuu ka soo kabsado oo si badqab leh shaqada uu ugu laabto, wakhtiga ugu habboon.</p> |

Haddii gargaarka degdegga ay tahay daaweynta keliya ee aad heshay, uma baahnid inaad usoo sheegto WSIB.

Ma hubo? Nala soo xiriir.

Soo sheegidda musuqmaasuqa iyo ku takrifalka nidaamka

Haddii aad ka shakidsid in qof u dembi sameeyay ama u ku takrifalayo badqabka goobta shaqada iyo nidaamka caymiska oo ay qayb ka tahay isku dayga joojinta lacagaha lagu soo dallacaayo WSIB, fadlan si qarsoodi ah inagu soo wargeli adigoo booqanayaa mareegta ah wsib.ca/reportfraud ama naga soo wac 1-888-745-3237.

Ma qabtaa wax su'aalo ah?

Iska diiwaangali adeegyadeena khadka tooska ah adigoo booqanaya bogga internet-ka wsib.ca/onlineservices si aad farriin noogu soo dirto waqti kasta, goob kasta.

Waxaad sidoo kale naga soo wici kartaa lambarka 1-800-387-0750 ama wac lambarka 711 adigoo adeegsanaya aaladaada TTY.